Oregon Health Authority
QEYBTA CAAFIMAADKA

# Su'aalaha Intabadan La Weydiiyo ee Uqalmitaanka Tallaalka ee Shakhsiyaadka Naafada ah, Qoysaskooda iyo Daryeelayaashooda

Qaar ka mid ah shakhsiyaadka naafada ah iyo qoysaskooda iyo daryeelayaashoodu waxay uqalmaan inay helaan tallaalka COVID -19 ee qaybta ka ah Wajiga 1a. Macluumaadka hoose waxaa loogu talogalay in lagu bixiyo jawaabaha su'aalaha la xiriira shaqsiyaadka uqalma inay ka mid noqdaan Wajiga 1a. Xitaa haddii qof uusan uqalmin marka loo eego kooxdan Wejiga 1a, way uqalmi karaan qaybta kale.

Qorshaha Isku-xigitaanka Tallaalka Wajiga 1a ee Oregon[1] waxaa kujira shaqsiyaadka soo socda:

- Shaqaalaha Daryeelka Guriga, Shaqaalaha Taageerada Shakhsi ahaaneed iyo dhammaan shaqaalaha daryeelka tooska ah/HCP ee mushaharka qaata iyo kuwa aan qaadan ee leh awoodda ay si toos ah iyo si aan toos ahayn ba u gaadhayaan bukaannada ama agabyada caabuqa leh ee lagu bixinayo daryeelka caafimaadka guriga, daryeelka gudaha guriga oo ay ku jiraan adeegyada kalkaalinta, taageerada guriga iyo adeegyada maalinta.
- Waalidiinta, oo ay ku jiraan waalidiinta koriya, iyo daryeelayaasha kale ee carruurta caafimaad ahaan jilicsan ama dadka waaweyn ee ku nool guriga.
- Carruurta buuxisa shuruudda uqalmida da'da ee tallaalada oggolaanshaha Adeegsiga Degdegga ah ee FDA (Pfizer, da'da 16 iyo wixii ka weyn; Moderna, da'da 18 iyo wixii ka weyn; Johnson & Johnson, 18 iyo wixii ka weyn) kuwaas oo la kulma xaalad caafimaad ama naafonimo oo u baahan shaqaale daryeel caafimaad, ama shaqaale daryeel toos ah (oo ay ku jiraan xubnaha qoyska) si ay u siiyaan adeegyoada gudaha guriga.

[1] https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li3527.pdf

- Dadka waaweyn ee ku nool gurigooda ama guriga qoyskooda ee leh xaalad caafimaad ama naafonimo oo u baahan shaqaalaha daryeelka caafimaadka, ama shaqaalaha daryeelka tooska ah (oo ay ku jiraan xubnaha qoyska) si ay u siiyaan adeegyada gudaha guriga. Tan waxaa ku jira shakhsiyaadka hela adeegyada Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Wakaaladaha Aagga ee Gabowga, Barnaamijyada Naafada Horumarinta Bulshada iyo Dulaaliinta.
- Dadka waaweyn ee ku nool xarumaha daryeelka ee ruqsad haysta, oo ay ku jiraan Guryaha Haynta Dadka Waaweyn, iyo xarumaha noolanshaha ee madaxa-bannaan ee leh xaalad caafimaad ama naafonimo oo u baahan shaqaale daryeel caafimaad, ama shaqaale daryeel toos ah

**Q1. Waa maxay macnaha caafimaad ahaan jilicsan?**

A1. Ereyga “caafimaad ahaan jilicsan” waxaa si guud loogu qeexay inuu macnaheedu yahay xaalad jireed oo joogto ah taasoo keenaysa baahi caafimaad oo dheer iyo/ama daryeelidda kalkaaliye xirfad leh ama daryeel shakhsiyeed oo kale loo baahan yahay.

**Q2. Ayaa uqalma inuu yahay qof ku nool guriga oo leh xaalad caafimaad ama naafonimo oo u baahan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ama shaqaalaha daryeelka tooska ah (oo ay ku jiraan xubnaha qoyska) si loo siiyo adeegyada guriga gudihiisa?**

A2. Shakhsiyaadkaan waxa ku jira dadka qaba xaalado caafimaad ama naafonimo oo ku nool gurigooda ama guriga qoyskooda oo ku tiirsan daryeelayaasha, hadday lacag qaataan iyo haddii kale ba, si ay u siiyaan adeegyada guriga gudhiisa sida hoos lagu sharraxay. Haddii shaqsi ku tiirsan yahay xubnaha qoyska ama mutadawiciinta si ay u siiyaan daryeelka guriga dhexdiisa ah, taasi sidoo kale waa la xisaabinayaa.

**Q3. Ayaa uqalma daryeel bixiye siinaya adeegyada guriga dhexdiisa shaqsi uqalma in lagu tallaalo Wajiga 1b, Kooxda 3?**

A3. Daryeelayaasha waxaa ka mid ah:

Daryeel bixiyayaasha mushaharka leh iyo kuwa aan lahayn iyo shaqaalaha daryeelka tooska ah:

- Qof bixiyay lacag si loogu siiyo adeegyo iyo taageero macaamiisha guryahooda
- Xubnaha qoyska, oo ay ku jiraan xaasaska, lammaanayaasha, waalidiinta, carruurta ama saaxiibbada ee siiya adeegyo guri taageero ama adeegyo, haddii ay mushahar qaatan iyo haddii kaleba, qofka naafada ah ama leh xaaladda caafimaad
- Mutadawaciinta ku siiya adeegyada guriga dhexdiisa macaamiisha guryahooda

**Q4. Maxay yihiin adeegyada qof u baahan yahay inuu helo si loogu qalmo ka mid ahaanshaha kooxdan?**

A4. Adeegyada waxaa ku jiri kara:

- Daryeelka caafimaadka guriga , tusaale ahaan:
  - Daryeelka nabarka
  - Daaweynta xididka ama nafaqada
  - Muditaannada
  - La socoshada xanuunada daran
  - Daaweynta Ogsajiinta iyo sambabada
- Daryeelka guriga dhexdiisa, taageerooyinka iyo adeegyada, tusaale ahaan:
  - Daryeelka shaqsi ahaaneed, sida maydhista ama dhar u xidhidda
  - Kormeerka caqabadaha garashada sida asaasaqa
  - Hawlaha guriga, sida nadaafadda, dhar dhaqidda, ama keenisata alaabada guri-dhexdiis
  - Cunto ugu karinta qofka gurigiisa
  - Tarjumaadda Luqadda (luqadda dhagoolka ama tarjumaadda saxda ah ama taageerooyinka kale ee isgaarsiinta)
  - Keenista cuntooyinka guriga (ee la xiriirta isdhexgalka guriga dhexdiisa(

**Helitaanka dukumiintiga:** Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. Kala xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.